Warbixin ku saabsan Dhismaha iyo Hagaajinta Mustaqbalka ee Glendale

**English**
This information is important. If you do not understand it, please call your MPHA representative for free language assistance.

**Hmong**
Yog koj tsi to taub txog cov nqi lust seem ceeb no, thov hu mus rau ntawm tsev luam qhov chaw ua hauj lwm MPHA peb yuav pab ntxhais rau nej.

**Somali**
Halkan waxaa ku qoran war ama akhbaar aad u muhim ah, haddii aad fahmi kari weydo, fadlan ula tag wakiilka hay'adda MPHA, si aad tarjumaad bilaash ah uga hesho.

**Oromo**
Beeksifni kun hedduu barbaachisaa dha. Yaadni isaa hoo isiniif hin galle ta'e, bakka bu'aa "MPHA" (Bulchiinsa Mana Mootummaa Magaalaa Minneapolis) akka afaan isiniif hiikamu gargaarsa tolaa gaafadhaa.

Amharic (Ethiopian)
ይህ መረጃ በጣም አስፈላጊ ነው። ምን እንደሚል የማይገባዎ ከሆነ፣ ከየ MPHA (የሚኒያፖሊስ የመንግስት የመኖሪያ ቤቶች ባለስልጣን) ወኪል ጋር ተገናኝተው በነጻ የሚሰጥ የቋንቋ[ማስተርጎም] እርዳታ እንዲሰጥዎ ይጠይቁ።

**Laotian**
ຖ້າຫາກວ່າທ່ານບໍ່ເຂົ້າໃຈໃນຂໍ້ຄວາມສໍາຄັນນີ້, ທ່ານຕ້ອງໂທໄປຫາທັງ ຫ້ອງການເຮືອນຫລວງ MPHA ພວກເຮົາຈະຊ່ວຍອະທິບາຍໃຫ້ທ່ານ.

**Spanish**
Esta información es importante, si usted no lo entienda, por favor póngase en contacto con MPHA para asistencia lingüística gratuita.

**Haddii aad u baahan tahay caawimaad luqadeed, hagaajinta ku habboon ee sababo la xiriira naafonimo, ama aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan warbixintan, la xiriir Maareeyaha Dhismaha, Kayse Kruske, taleefanka (612) 342-1556**

[Boggan si ula kac ah ayaa loo daayay isagoo madhan]

3da Oktoobar, 2025

Degganayaasha Qaaliga ee Glendale:

Tan iyo dhammaadkii 2024, MPHA waxa ay kulamo taxane ah oo ay la yeelatay dadka deegaanka si looga wada hadlo mustaqbalka Glendale. Intii lagu jiray wada sheekaysigan, dadka deegaanku waxay muujiyeen jacaylkooda ay u qabaan bulshada Glendale, mahadnaq qoto dheer oo ay u hayaan guryahooda, iyo aqoonsi in guryahoodu aysan buuxin baahiyahooda hadda jirta isla markaana ay u baahan yihiin horumar iyo hagaajin.

Dadka deegaanka waxay nala wadaageen waxyaabaha ay ka jecel yihiin guryahooda, oo ay ku jiraan albaabbada hore, barxadaha dambe, meelaha cagaaran ee bulshada, iyo jardiinooyinka, gaadiidka dadweynaha, dugsiyada, iyo adeegyada u dhow. Si kastaba ha ahaatee, sidoo kale waxay nala wadaageen sheekooyin ku saabsan dhibaatooyinka xaddidaya dadka naafada ah, qoysaska waaweyn oo hal musqul ku wadaagaya, jikada oo aad u yar, iyo baahida loo qabo hawo nadiif ah iyo qaboojiye gudaha.

Wada hadalkan waxaa ka soo baxay: **Deggeneyaasha Glendale waxay mudan yihiin si ka sii wanaagsan.**

Taasi waa sababta, kadib bilo badan oo kulamo bulshada ah, **shaqaalaha MPHA ay u qaadayaan tallaabooyinka xiga ee qorshaha mustaqbalka Glendale.** Tani waxay ka mid tahay shaqaalaha hay'adda oo la shaqeynaya naqshadeeyayaal iyo kooxo dhisme si loo sahmiyo fursadaha dhismaha mustaqbalka ee ku saleysan mudnaanta dadka deegaanka, kordhiya ku-noolaanshaha guryaha, ilaaliya adeegyada xaafadda, isla markaana kobciya bulshada Glendale.

Bilaha soo socota, MPHA waxay qaadi doontaa tallaabooyin horumarinaya shaqadan, oo ayna ku jiraan:

| | |
|---|---|
| **Dayrta 2025** | MPHA waxay shaqaaleysiin doontaa naqshadeeye iyo koox dhisme si ay u sahmiyaan fursadaha naqshadeynta. Kooxahan ayaa bilaabi doona daraasadda Glendale si loo fahmo sida dib-u-habaynta lagu daro guryaha jira ay u ekaan karto ama nooca dhismayaasha cusub ee lagu dhisi karo goobta. |
| **Dayrta 2025 – Xagaaga 2026** | Shaqaalaha MPHA waxay dhisi doonaan koox talo-bixin ah oo deggeneyaal ah si ay gacan uga geystaan hagida mashruuca iyo qabashada kulamo bulsho oo lagu falanqeeyo horumarka isla markaana la ururiyo jawaab celin dheeraad ah. |
| **Xagaaga 2026** | Shaqaalaha MPHA waxay bilaabi doonaan inay raadiyaan oggolaanshooyin lagama maarmaan ah oo ka socda magaalada, gobolka, iyo federaalka si loo hormariyo mashruuca dhismaha weyn ee Glendale. |

Dhabarka dambe ee warqaddan waxaa ku yaal tilmaamaha qorshaynta ee MPHA ay isticmaali doonto si ay u horumariso mashruuca bilaha soo socda. Tilmaamahan waxaa laga soo qaatay ballanqaadyadii shaqaalaha MPHA ay la wadaageen dadka deegaanka gu'gii la soo dhaafay. **Fadlan dib u eeg agabkaas oo wac maamulahaaga hantida haddii aad qabtid wax su'aalo ah.**

Bilaha soo socda, waxaad filan kartaa warbixino joogto ah oo ku saabsan horumarka hay'adda. Shaqaalaha hay'adda ayaa ku faraxsan inay qaadaan tallaabooyinkan xiga ee wada-shaqeynta mustaqbalka Glendale.

Mahadsanid,

Abdi Warsame
Agaasimaha Fulinta/CEO, Minneapolis Public Housing Authority

## Tilmaamaha iyo Tallaabooyinka Ficilka ee Mustaqbalka Glendale

*MPHA waxay soo diyaarisay mabaadi' iyo talaabooyin ficil oo laga soo ururiyey jawaab celinta dadka Glendale ay bixiyeen kulamadii dhawaan dhacay. Tani waxay ka tarjumaysaa rabitaanka iyo rajooyinka horumarinta Glendale iyo welwelka dadka deegaanka ee ku saabsan barakac, ka guuridda guryahooda, iyo awooddooda ay dib ugu soo laaban karaan Glendale qayb ka noqoshada mashruuc kasta oo dhismo weyn ah. Mabaadi'dan iyo tallaabooyinkan ficil waxay u adeegaan sidii qaab-dhismeed lagu hago tallaabooyinka xiga ee Glendale.*

---

**Mabda' #1: Abuur Guryo Sharaf leh oo loogu talagalay 600-ka Qoys ee hadda Glendale ku nool, kuwaas oo ka tarjumaya mudnaantooda isla markaana caawin doona qoysaska ku jira liiska sugitaanka ee MPHA.**

**Talaabooyin:**

- Sahmi dib-u-habaynta lagu daro guryaha jira iyo dhismaha guryo cusub.
- Hubi in naqshadda mashruucu kordhiso ku-noolaanshaha guryaha isla markaana mudnaanta dadka deegaanka la geliyo.
- Hubi in naqshadda mashruucu ilaaliso adeegyada xaafadda oo kobciso bulsho isku xiran.
- Sahmi fursadaha lagu dari karo guryo leh qolal badan iyo kuwo yar, iyo guryo hal dabaq ah oo si fudud loo geli karo.
- Sahmi hababka dhismaha ee yareyn kara baahida dadka looga raro goobta dhismaha inta lagu jiro mashruuca.
- Hubi in naqshaddu la jaanqaado heerarka helitaanka ee gobolka iyo federaalka intii ugu macquulsan.
- Sahmi dhammaan fursadaha suurtagalka ah ee MPHA uga heli karto maalgelin federaal oo joogto ah si loo taageero Glendale, oo ay ku jiraan isticmaalka barnaamijyada HUD ee RAD iyo Section 18.
- Sahmi maalgelinta magaalada, gobolka, iyo federaalka ee taageeri karta dhismaha mustaqbalka Glendale.

**Mabda' #2: Mudnaanta iyo codadka dadka deegaanka ka dhig xudunta mashruuca wejigiisa kasta— laga bilaabo fikradda ilaa dhammaystirka.**

**Talaabooyin:**

- Abuur koox talo-bixin deggeneyaal ah oo matasha bulshada ballaaran isla markaana la shaqaysa MPHA inta lagu jiro qorshaynta iyo dhismaha, barakaca, iyo hawlaha ballaaran ee dadka deegaanka.
- Dhiirrigeli sameynta gole deggeneyaal Glendale, isla markaana taageer inta lagu jiro iyo ka dib dhismaha.
- Diyaari qandaraas barakaca oo qeexaya ballanqaadyada MPHA iyo xuquuqda federaaliga ah ee dadka deegaanka.
- La shaqee qoys kasta si gaar ah si loo diyaariyo ikhtiyaar barakac oo ku habboon baahida qoyskooda.
- Hubi in ilaalinta dadka deegaanka ee soo socda la tixgeliyo qayb ka mid ah mashruuc kasta oo mustaqbalka ah:
    - Deggeneyaashu waxay sii wadi doonaan bixinta kirada oo la mid ah 30% dakhliga ay saxday.
    - Dadka deegaanka ee lagu raro meel ka baxsan goobta inta lagu jiro dhismaha waxaa laga dammaanad qaaday inay xaq u leeyihiin inay dib ugu soo laabtaan.
    - Inta suurtagalka ah, dadka deegaanka waxaa la siin doonaa ikhtiyaar ay goobta ku sii joogaan inta dhismaha lagu jiro.

###

*Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah iyo sidoo kale agabkii kulamadii hore iyo soo koobiddadooda bogga maashruuca: https://mphaonline.org/mpha-housing/portfolio/glendale-townhomes*

*Haddii aad xiisaynayso inaad ku biirto kooxda talo-bixinta dadka deegaanka si aad u qaabeyso mustaqbalka Glendale, fadlan la xidhiidh maamulaha deegaankaaga, Kayse Kruske, tel: (612) 342-1556.*